

Dokumentiyada la aqbali karo ee xaq-u-yeelashada shuruudda ku xiran

Hordhac

Xaaladaha qaarkood, Washington Healthplanfinder™ wuxuu u baahan yahay macluumaad xaqiijin dheeraad ah oo ku saabsan qoyskaaga si laguugu qoro caymiska. Arrintan waxay dhacdaa marka nidaamyada eega codsigaaga aysan xaqiijin qaar ka mid ah macluumaadkaaga. Istimaal qaybaha hoose si aad u aragto liiska dhammeystiran ee noocyada dokumentiyada la aqbali karo si aad macluumaadka u siiso Washington Healthplanfinder.

Tusmada

Hordhac.....	1
Caddeynta dakhliga iyo ka jaridda.....	2
Caddeynta joogitaanka sharciga ah.....	4
Caddeynta Jinsiyadda ama dhalashada Mareykanka ah.....	11
Caddeynta caymis caafimaad kale la'aan.....	13
Caddeynta xiritaan la'aanta.....	14
Caddeynta lambarka Damaannada Bulshada (SSN).....	15
Caddeynta xubinnimada Qabiilka.....	15

La Cusboonaysiiyay Nofembar 2024

Caddeynta dakhliga iyo ka jaridda

Dakhliga la kasbadey - Mushaaraadka dadka aan iskooda-u-shaqeysan

- Gummadka ka soo hara jeegga mushaarka. Waa in ay ku qoran yihiin:
 - Magaca saddexad ee qofka iyo macluumaadka kale ee lagu aqoonsado si loogu xiriiriyo qofka.
 - Qaddarka dakhliga.
 - Muddada lacag-bixinta ama inta jeer ee lacagaha la bixiyay oo ku xusan taariikhda lacag-bixinta.
 - Foomka Canshuurta Dakhliga Gobolka/Federaalka, 1040, 1040NR, 1040A, 1040EZ, 1040PC, 1040X w/asalka 1040 ee sannadkii hore, 1040 oo la socda Jadwalka EIt waa in ay ku jiraan magaca saddexan ee qofka, qaddarka dakhliga iyo sannadka canshuurta.
- Mushaaraadka iyo bayaanka canshuurta (W-2 iyo/ama 1099, oo ay ku jiraan 1099 MISC, 1099G, 1099R, 1099SSA, 1099DIV, 1099SS, 1099INT).
 - Waa in ay ku qoran yihiin magaca koowaad iyo kan dambe ee qofka, qaddarka dakhliga, sanadka iyo magaca loo-shaqeeyaha (haddii ay ku habboon tahay).
- Bayaanka loo-shaqeeyaha waa in uu ku jiro:
 - Magaca qofka la shaqaaleeyay.
 - Taariikhda iyo saxiixa loo-shaqeeyaha.
- Dakhliga dibadda, Gummadka ka soo hara jeegga mushaarka ama dokumentiga kale.
 - Istimaal beddelka lacagta hadda.

Dakhliga la kasbadey - Iskaa-u-shaqeysiga (waxaa ka mid ah dakhliga beerta)

- Dokumentiga diiwaanka weyn ee iskaa-u-shaqeysiga (ayaa noqon kara Jadwalka C, bayaankii ugu dambeeyay ee khasaaraha iyo faa'iidada saddexdii bilood ama sanad-ilaa-hadda la sameeyo, ama diiwaanka weyn ee iskaa-u-shaqeysiga).
 - Waa in ay ku qoran yihiin magaca koowaad iyo magaca dambe ee qofka, magaca shirkadda, iyo qaddarka dakhliga.
 - Diiwaanka weyn ee iskaa-u-shaqeysiga waa in ay ku jiraan taariikhda ku xusan diiwaanka weyn iyo dakhliga saafiga ah ee faa'iidada/khasaaraha.
- 1040 SE oo la socda Jadwalka C, F, ama SE (loogu talagalay dakhliga iskaa-u-shaqeysiga).
- 1065 Jadwalka K1 oo la socda Jadwalka E.
- Canshuur celinta.

- Rasiidyada diiwaannada buug-haynta ee DHAMMAAN kharashaadka la oggol yahay.
- Bayaannada bankiga (shakhsi iyo ganacsi) iyo jeegagga la baajiyay.
- Xaashiyada waqtiga ee la saxiixay iyo rasiidka liiska mushaaraadka, haddii aad shaqaale haysato.
- Bayaankii ugu dambeeyay ee khasaaraha iyo faa'iidada ee saddexdii bilood ama sanad-ilaa-hadda.

Dakhligeenka aan la kasban

- Bayaanka lacagta go'an ee sanadkii qofka la siiyo.
- Bayaanka qaybinta lacagta hawlgabka la siiyo ee laga helo il dowladeed ama gaar loo leeyahay.
- Warqadda magdhowga shaqaalaha.
- Abaal-marinnada, bayaannada iyo biladaha, oo ay ku jiraan masruufka la helay iyo warqadda abaal-marinta ay maxkamaddu amartey.
- Caddeynta hadiyadaha iyo wax-ku-biirrinta.
- Caddeynta dhaxalka ee kaashka ama hantida maguurtada ah.
- Caddeynta mushaarka shaqo joojinta iyo dheefaha kale ee laga helo ururrada shaqaalaha.
- Rasiidyada iibka ama caddeynta kale ee lacagta laga helay iibka, isdhaafsiga ama beddelka waxyaabaha uu qofku iska leeyahay.
- Bayaanka dakhligeenka dulsaarka iyo saami-qaybsiga.
- Bayaanka amaahda ee muujinaya lacagaha ka soo xarooda amaahda.
- Bayaanka dakhligeenka oggolaanshaha shayga ama 1099-MISC.
- Caddeynta lacag-bixinnada dhiirrigelinta/gunnooyinka (sida warqadda bayaanka bankiga ee muujinaya dhigidda).
- Caddeynta lacag-bixinta shaqo ka-saaridda.
- Gummadka ka soo hara jeegga mushaarka ee tilmaamaya mushaarka bukaanka.
- Warqadda, lacag dhigidda, ama caddeynta kale ee lacag-bixinnada magdhowga ee dib loo dhigay.
- Gummadka ka soo hara jeegga mushaarka ee tilmaamaya mushaarka beddelka/kaaliyaha.
- Gummadka ka soo hara jeegga mushaarka ee tilmaamaya mushaarka fasaxa.
- Caddeynta haraaga.
- Warqadda, lacag dhigista, ama caddeymaha kale ee muujinaya safarka/dib-u-bixinta lacag ganacsi.
- Bayaannada Maamulka Dammaanada Bulshada (Warqadda Dheefaha Damaannada Bulshada)
 - Hawlgabka, Caymiska Naafonimada Dhibbanayaasha (RSDI), Hawlgabka Damaannada Bulshada, Caymiska Naafonimada Damaannada Bulshada (SSDI).
 - Waa in ay ku jiraan magaca koowaad iyo kan dambe, qaddarka dheefta iyo inta jeer ee lacagta la bixiyay.
- Warqadda Dheefaha Shaqo La'aanta.

- Waa in ay ku qoran yihiin magaca koowaad iyo kan dambe ee qofka, isha/hay'adda, qaddarka dheefta, iyo muddada (taariikhda bilowga iyo dhammaadka, haddii ay ku habboon tahay).

Haddii kuwa kore ku xusan midkoodna aan la heli karin, Foomka Ka-reebnaanta Xaqiijinta Xaq-u-yeelashada Duruufaha Gaarka ah ayaa waxaa laga heli karaa bartan

https://www.wahealthplanfinder.org/content/dam/wahbe-assets/materials/exception-to-verification-for-income/HBE_NC_022024_EN_Exception_To_Eligibility_Income_Form.pdf

Caddeynta joogitaanka sharciga ah

Deganayaasha Joogtada ah ee Sharciga ah (LPR/haystaha kaarka cagaaran/Green Card)

- [Kaarka Degganaanshaha Joogtada ah ama "Green Card"](#) (Kaarka Cagaaran) (I-551).
- [Shaabadda ku-meelgaarka ah I-551](#) ee foomka I-94/I-94A ama baasaboorka ajnabiga ah.
- [Fiisaha Muhaajirka ee ay Makiinadda Akhrin Karto oo leh luuqadda I-551 ee ku-meelgaarka ah.](#)
- [Rukhsadda Dib-u-soo-gelidda \(I-327\).](#)
- [Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda \(I-94\)](#) (oo u muujinaya shaabadda soo-gelidda LPR ahaan).
- [Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda \(I-94\) oo saaran baasaboorka ajnabi](#) (oo u muujinaya shaabadda soo-gelidda LPR ahaan).
- Amar ay soosaartey Wasaaradda Amniga Gudaha (DHS), Guddiga Rafcaannada Socdaal, ama Garsoore Socdaal oo ku oggolaanayo diiwaangelin, joojinta tarxiilka, baajinta meesha ka saaridda ama hagaajinta xaaladda.
- Rasiidka laga helay USCIS oo muujinaya in Foomka I-90, codsiga kaarka beddelka ee LPR, ayaa la soo xareeyay.

Magangalyo-doonnada – kaliya shakhsiyaadka loo oggolaaday oggolaansho shaqo AMA ay da'doodu ka yar tahay da'da 14

- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94) (oo ku shaabadeysan shaabad muujinaysa oggolaanshaha magan-galyo-doonka, "Magangalyo-doon" ama "§208").
- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94) ee baasaboorka ajnabiga ah (oo ku shaabadeysan shaabad muujinaysa oggolaanshaha magan-galyo-doonka, "Magangalyo-doon" ama "§208").
- Amarka oggolaanaya magan-galyo doonta USCIS, DHS, Garsoorka Socdaalka, Guddiga Rafcaannada Socdaalka ama maxkamadda federaalka.
- [Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada \(Kaarka\) \(I-766\)](#) (lagu sharxay "A5").
- [Dokumentiga Socdaalka Qaxootiga \(I-571\).](#)
- Kaarka Degganaha Joogtada ah, "Green Card" (Kaarka Cagaaran) (I-551) (lagu sharxay "AS1," "AS2," "AS3," "AS4," "AS5," "AS6," "AS7" "AS8," "GA6," "GA7," "GA8").
 - OGOW: Sharraxaadda I-551 waxay muujinaysaa xaaladda ka horreysa waafaqjinta LPR taas oo kaliya khuseysa ka-reebidda muddada mamnuuca 5-sano ah ee magangalyo-doonnada.

Qaxootiga

- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94/I-94A) (ku shaabadeysan “Qaxooti” ama “§207”).
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay “A3”).
- [Dokumentiga Socdaalka Qaxootiga \(I-571\)](#).
- Kaarka Degganaha Joogtada ah, “Green Card” (Kaarka Cagaaran) (I-551) (waxaa lagu sharxi karaa “RE6,” “RE7,” “RE8,” ama “RE9”).
 - OGOW: Sharraxaadda waxay muujinaysaa xaaladda ka horreysa waafajinta LPR taas oo kaliya khuseysa ka-reebidda muddada mamnuuca 5-sano ah ee qaxootiga.
- Codsiga Oggolaanshaha Shaqaalaha (I-765), ama rasiidka laga helay USCIS ee tilmaamaya xareynta codsiga.

Soo-galootiga Shuruudaha Lagu Xiray (CE) la oggolaaday ka hor 1980

OGOW: Xaaladdan waa xaaladda socdaalka ee loo adeegsado qaxootiga ka hor Xeerka Qaxootiga 1980; intooda badan waxaa la waafajiyay LPRs, in kastoo qaar ay yeeshaan xaaladda CE.

- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94/I-94A) (ee tilmaamaya xaaladda in ay tahay “soo-galootiga shuruud ku xidan”, “soo-galootiga qaxootiga ah ee shuruudaha ku xiran” “Dookha Toddobaad”, “§203(a)(7)” ama “P7”).
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay “A3”).
- Kaarka Degganaha Joogtada ah ama “Green Card” (Kaarka Cagaaran) (I-551) (waxaa lagu sharxi karaa “R86”).
 - OGOW: Sharraxaadda waxay muujinaysaa xaaladda ka horreysa waafajinta LPR taas oo kaliya khuseysa ka-reebidda muddada mamnuuca 5-sano ah ee soo-galootiga shuruudaha ku xiran.

Shakhsiyaadka loo oggolaaday in aanan la tarxiili karin ama kuwa aanan haysan oggolanshaha in aanan la tarxiili karin si waafaqsan shuruucda socdaalka ama Mucaahaddada Ka Dhanka ah Jirdilka

Macluumaadkan waxaa kaliya loogu talagalay shakhsiyaadka loo oggolaaday shaqada.

- Dokumentiga tilmaamaya in qof aanan la tarxiili karin (tusaale, amarka oggolaanaya in aanan qofka la tarxiili karin ee ay soosaareen USCIS, DHS, Garsoore Socdaal, Guddiga Rafcaannada Socdaalka, ama maxkamad federaal).
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay “A10”).
- Amarka maamul ee joojinaya in qofka laga tarxiilo ama dalka laga saaro oo ay soosaartey Waaxda Amniga Gudaha.
- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94/I-94A) (ku shaabadeysan “Laga Joojiyay in La Tarxiilo,” “§243(h)” ama “§241(b)(3)”).
- Dokumentiga Socdaalka Qaxootiga (I-571).

Shakhsiyaadka lagu sii daayay Mareykanka oo ah si ku salaysan ka waantibid dambi ugu yaraan hal sano

- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94/I-94A) (oo ku shaabbadeysan shaabbad muujinaysa “siidayn ku salaysan ka waantibid dambi” ama “PIP” ama “212(d)(5)” ama luuqad kale oo muujinaysa xaaladda siidaynta ku salaysan ka waantibid dambi).
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay “A4” ama “C11”).
- Oggolaanshaha Shaqada iyo Kaarka siidaynta ku salaysan ka waantibid dambi ee Horumarsan (I-512) (oo lagu sharxay sababta siidaynta ku salaysan ka waantibid dambi loogu oggolaaday si waafaqsan Madaxa 8aad ee Xeerka Xeernidaamyada Federaalka)
- Ogeysiiska ama amarka maxkamadeed ee uu soosaarey Garsoore Socdaal uu ku siidaynta ku salaysan ka waantibid dambi ugu yaraan hal sano.

Soo-galootiga Kuuba ama Hayti

- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94/I-94A) (ku shaabbadeysan shaabadda muujinaysa “Soo-galootiga Kuuba/Hayti (Cuban/Haitian Entrant)” ama sharraxaad kastoo kale oo muujinaysa “siidaynta ku salaysan ka waantibid dambi oo waafaqsan §212(d)(5)”, oo ay ku jiraan “CU6,” “CU7,” ama “CH6,” iyo kuwo kale — dhif ah tan iyo 1980-yadii).
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay “C8,” ama “C11”).
- Shaabadda I-551 ee Ku-meelgaarka ah (ee la saaro baasaboorka ama I-94/I-94A).
- Kaarka Degganaha Joogtada ah, “Green Card” (Kaarka Cagaaran) (I-551) (waxaa lagu sharxay “CU6,” “CU7,” “CU8”).
 - OGOW: Sharraxaadda I-551 waxay muujinaysaa xaaladda ka horreysa waafajinta LPR taas oo kaliya khuseysa ka-reebidda muddada mamnuuca 5-sano ah ee soo-galootiga Kuuban/Haytiyanka ah.
- Rasiid ama ogeysiis muujinaya xareynta ama xaaladda sugitaanka Codsiga Magangalyo-doonka iyo ka joojinta masaafurinta (I-589).

Dhibbanaha tacaddiga guriga ka dhexdhaca u-qalma

Waalidka iyo/ama cunuga lammaanaha ama ilmaha la garaacay ama ay Mareykanka gudahiisa ugu geysteen naxariis-darro aad ah xaas, waalid ama qaraabada isla qoyska loo oggolaaday sugaya codsiga waafaqsan Xeerka Tacaddiga Ka-dhanka ah Haweenka (VAWA) ee loogu talagalay:

- (1) Xaaladda lammaanaha ama cunuga muwaadin Mareykan ah,
- (2) Xaaladda lammaanaha ama cunuga degganaha joogtada ah ee sharciga ah ee Mareykanka,
- (3) Hakinta/laalidda masaafurinta, ama
- (4) Baajinta in dalka laga saaro.
 - Ogeysiiska Tallaabada (I-797) (tixraacaya sugitaanka "I-360").
 - Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "A10," "C14," "C9," "C10," "C14" ama "C31").
 - Rasiidka ama caddeynta kale ee soo gudbinta I-485 "Codsiga Diiwaangelinta Degganaha Joogtada ah ama Xaaladda Waafajinta."
 - Dokumentiyo kasta ee muujinaya kiiska hakinta/laalidda masaafurinta ama baajinta in dalka laga saaro oo go'aan suge ah, oo uu ku jiro rasiidka laga helay maxkamadda socdaalka oo muujinaya xareynta Codsiga Hakinta/Laalidda Masaafurinta (EOIR-40) ama Codsiga Baajinta in Dalka Laga Saaro (EOIR-42).
 - Rasiidka ama caddeynta kale ee xareynta codsiga fiisaha I-130 ee waafaqsan qaraabada dhow (IR) ama dookha qoyska labaad (P-2) ee muujinaya xaaladda lammaane ama cunug.

Dhibbanaha tahriibka ama lammaanahiisa/lammaanaheeda, ilmaha, walaalka ama waalidka

Ama shakhsiyaadka leh codsiga go'aan sugaha ah ee fiisaha dhibbahana tahriibka.

- Shahaadda laga qaatay Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga (ORR).
- Warqadda xaq-u-yeelashada ORR haddii uu qofku ka yar yahay da'da 18.
- Xaaladda shahaadda ee lagu xaqiijiyay Khadka Xaqiijinta Tahriibinta ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha (866)-401-5510.
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "A16," "C25").
- Ogeysiiska Waxqabadka (I-797) ("Ogeysiiska Oggolaanshaha" ee loogu talagalaya "CP," "T-1" ama "ballaarinta T ama U xaaladda qofka aan muhaajirka ahayn", "T-2," "T-3," "T-4," "T-5").
- Kaarka Degganaha Joogtada ah, "Green Card" (Kaarka Cagaaran) (I-551) (waxaa lagu sharxay "ST6," "ST7," "ST8," "ST9," or "ST0").
- Oggolaanshaha Shaqada iyo Kaarka Siidayn ku Salaysan ka Waantibid Dambi ee Horumarsan (I-512) (oggolaanshaha siidaynta ku salaysan ka waantibid dambi, oo tilmaamaya xaaladda "T-2," "T-3," "T-4," "T-5").
- Codsiga Fiisaga T (I-914).

Xubinka Qabiilka federaal ahaan loo aqoonsadey ama Hinddi Ameerikaan ku dhashey dalka Canada

- Shahaaddada laga helay Waaxda Arrimaha Gudaha oo caddeynaysa Asaka Qabiilka Ameerikaanka Dhaladka ah ama dokumenti kale oo awood leh.
- Warqad ka timid Waaxda Arrimaha Hinddida ee Kanada, diiwaannada dhalashada ama gaalaysiinta ee laga bixiyay Dhulka Seeraha ah ee Hinddida dalka Canada, ama diiwaannada iskuulka ama Qabiilka ee caddeynaya in Hinddiada Mareykanka ku dhashey dalka Canada in uu yahay ugu yaraan qof kala bar awoowayaashiisu ay ka soo-jeedaan Hinddida Ameerika.

Shakhsiga leh xaaladda aan muhaajirka ahayn (fiisayaasha warqadda), oo ay ku jiraan fiisayaasha shaqaalaha (sida H1, H-2A, H-2B), fiisayaasha ardayga, Fiisaha-U, Fiisaha-T iyo fiisayaasha kale

- [Shahaaddada Xaq-u-yeelashada Xaaladda Ardayga Aan Muhaajirka Ahayn \(I-20\)](#) ee taageera codsiyada xaaladaha fiisaha ardayga (F-1s ama F-2s).
- [Shahaaddada Xaq-u-yeelashada Xaaladda Soo-booqdaha Isdhaafsiga \(DS2019\)](#) ee taageera codsiyada xaaladaha fiisaha soo booqdaha isdhaafsiga (J-1s ama J-2s).
- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94/I-94A) (oo tilmaamaya soo gelidda Mareykanka oo leh xaaladda qofka aan muhaajirka ahayn ee U) Baasaboortan Ajnabi (oo tilmaamaya ku soo galidda Mareykanka fiiso aan muhaajir ahayn).
- Ogeysiiska Waxqabadka (I-797) ("Oggolaanaya xaaladda qofka aan muhaajirka ahayn," "Oggolaanshaha codsiga lagu ballaarinayo/beddelayo xaaladda qofka aan muhaajirka ahayn).
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (tilmaamaya xaaladda qofka aan muhaajirka ahayn).
- Caddeynta soo gudbinta Foomka I-918.
- Rasiidka Foomka I-102 ama I-918.

Muwaadiniinta Micronesia, the Marshall Islands iyo Palau

- Diiwaanka Imaanshaha/Bixidda (I-94/I-94A).
- Baasaboortan Ajnabi (lagu sharxay "CFA/RMI," "CFA/FSM" ama "CFA/PAL."
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "A8").

Deganayaasha Aan Joogtada ahayn ee Sharciga ah

- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "A2"), ama leh caddeyn kale oo tilmaamaysa xaq-u-yeelashada waafaqsan "§210" ama "§245A").
- Codsiga Degganaanta Aan Joogtada Ahayn loogu Beddelaya Degganaan Joogto ah oo ah si waafaqsan INA §245A (I-698).

Shakhsiyaadka leh Xaaladda Ku-meelgaarka ah ee La Ilaaliyo (TPS)

Kaliya shakhsiyaadka loo oggolaaday oggolaanshaha shaqada.

- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "A12").
- Ogeysiiska Waxqabadka (I-797) (muujinata oggolaanshaha xaaladda TPS).

Shakhsiyaadka loo oggolaaday Bixidda La Dhaqangeliyay ee Dib-loo-dhigay (DED)

- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "A11").

Shakhsiyaadka loo oggolaaday Xaaladda Waxqabadka Dib-loo-dhigay

- Ogeysiiska Waxqabadka (I-797) (ee tilmaamaya oggolaanshaha xaaladda "waxqabadka dib-loo-dhigay").
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "C14" ama "C33").

Ka-faa'iideystayaasha Midowga Qoyska

- Ogeysiiska Waxqabadka (I-797) (tilmaamaha oggolaanshaha "Codsiga Midowga Qoyska (I-817)").
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "A13").

Shakhsiyaadka haysta Amarka Kormeerka - kaliya shakhsiyaadka loo oggolaaday oggolaanshaha shaqada

- Ogeysiiska ama foomka muujinaya siideynta hoos imaanaysa "Amarka Kormeerka."
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766).

Dadka Deggan American Samoa

- Dokumentiga muujinaya shakhsiga in uu deggan yahay, ama ku nool yahay, American Samoa.

Codsadayaasha diiwaangelinta - kaliya shakhsiyaadka loo oggolaaday oggolaanshaha shaqada

- Rasiidka ama ogeysiiska muujinata Foomka I-485 ee xareynta "Codsiga Diiwaangelinta Degganaha Joogtada ah ama Xaaladda Waafajinta."
- Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766).

Codsadayaasha mid kastoo ka mid ah xaaladahan soo socda:

- Xaaladda Ku-meelgaarka ah ee La Ilaaliyo (TPS) kaliya **leh** Oggolaansho Shaqo.
 - Rasiid ama ogeysiis muujinaya xareynta ama xaaladda go'aan sugitaanka "Codsiga Xaaladda Ku-meelgaarka ah ee La Ilaaliyo" (I-821).
 - Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "C19").
- Waafajinta Xaaladda LPR.
 - Ogeysiiska Waxqabadka (I-797) (Ogeysiiska Magacaabista ASC oo la socda Nooca Kiiska "Codsiga I-485...", "Rasiidka Codsiga Oggolaanshaha Shaqada ee ku saleysan C9").
 - Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (tusaale, lagu sharxay "C9" ama "C9P").
 - Oggolaanshaha Shaqada iyo Kaarka Siidaynta ku Salaysan ka Waantibid Dambi ee Horumarsan (I-512) (oggolaanshaha siidaynta ku salaysan ka waantibid dambi, oo tilmaamaya codsada wax-ka-beddelka xaaladda).
 - Rasiidka muujinata xareynta ama xaaladda go'aan suga ah ee Foomka I-485 "Codsiga Diiwaangelinta Degganaha Joogtada ah ama Xaaladda Wax-ka-beddelka."
- Sharcileynta waafaqsan IRCA ama Xeerka LIFE ee kaliya **la socda** oggolaanshaha shaqada.
 - Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka)(I-766) (lagu sharxay "Codsiga Degganaanshaha Ku-meelgaarka ah ee waafaqsan INA §245A" (I-687)).
 - Baasaboar Ajnabi (oo saaran shaabbad ama qoraal uu ku qoray sarkaalka INS/DHS, oo tilmaamaya go'aan sugid "Codsiga §245A").
- Xaaladda Gaarka ah ee Dhallinyarada Muhaajiriinta ah.
 - Ogeysiiska Waxqabadka (I-797) ("Ogeysiiska Oggolaanshaha Gaarka ah ee Dhallinyarada Muhaajiriinta ah," "Ogeysiiska Soo Dhowaanshaha/Oggolaanshaha I-485," ama "Aasaaska Kale ee Wax-ka-beddelka SL6").
 - Kaarka Degganaha Joogtada ah, "Green Card" (Kaarka Cagaaran) (I-551) (lagu maldahay "SL6").
- Magangalyo-doonka ama Ka Joojinta Masaafurinta/Dal Ka-saaridda, oo ay ku jiraan codsadaaasha hoos imaanaya Mucaahaddada Ka Dhanka ah Jirdilka (CAT) ee kaliya haysta oggolaanshaha shaqo ama ay da'diisu ka yar tahay da'da 14aad.
 - Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766) (lagu sharxay "C8").
 - Rasiid ama ogeysiis muujinaya xareynta ama xaaladda go'aan sugitaanka "Codsiga Magangalyo-doonka iyo Ka-joojinta Masaafurinta" (I-589).
 - Fiisaha Dhibbanaha Tahriibka.

- Ka-joojinta Masaafurinta, ama Ka-joojinta Ka-saaridda Dalka, ee waafaqsan shuruucda socdaalka ama waafaqsan Mucaahaddada Ka Dhanka ah Jirdilka (CAT) ee kaliya **haysta** oggolaansho shaqo.
 - Baajinta in Dalka Laga Saaro ama Joojinta Masaafurinta leh oggolaansho shaqo.
 - Rasiidka ama Ogeysiiska muujinaya xareynta Foomka EOIR-40, EOIR-42, ama “Codsiga hakinta/laalidda masaafurinta ama Baajinta Xeerka Gaarka ah ee in Dalka Laga Saaro” (I-881).
 - Dokumentiga Oggolaanshaha Shaqada (Kaarka) (I-766).

Caddeynta Jinsiyadda ama dhalashada Mareykanka ah

Caddeynta jinsiyada (kaligeeda istaagi karta) aasaasiga ah

- Baasaboor Mareykan ah/ Kaarka Baasaboorka Mareykanka (weli sax ah xitaa haddii uu dhacey).
- Aqoonsiga La Wanaajiyay ama Shatiga Darawalka (waa in ay sheegaan “Enhanced” [La-wanaajiyay]) markay ahayd Abriil 2024, lagu bixiyay kaliya gobollada Michigan, Minnesota, New York, Vermont iyo Washington.
- Kaarka Nexus (oo aan dhicin).
- Warqadda Dhalashada Mareykanka
 - Foomka INS ee N-560.
 - Foomka INS ee N-561.
- Warqadda Jinsiyadda
 - Foomamka INS N-550, N-570, N-578, ama N-565.
- Caddeyn dokumenti oo uu soosaarey Qabiilka Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Dhallad ah ee ay dowladda federaalka aqoonsan tahay. Dokumentiyada waa in ay magaca shakhsiga aqoonsadaan oo ay xaqiijiyaan xubinnimada, isqoritaanka, ama xiriirka uu Qabiilka la leeyahay. Dokumentiyada waxaa ka mid ah balse aan ku xaddidnayn:
 - Kaarka isqoritaanka qabiilka.
 - Shahaaddada Heerka Dhiigga Hinddida.
 - Dokumentiga tirakoobka qabiilka.
 - Dokumentiyada saaran calaamad Qabiil ee uu saxiixay hoggaamiyaha qabiilka.

Caddeynta labaad ee jinsiyadda/dhalashada

Haddii codsadhaha uusan haysan wax ka mid ah caddeynta sare ku xusan ee (kaligeeda istaagi karta) aasaasiga, codsadhaha waa in uu bixiyaa laba dokumenti (caddeyn labaad), mid ka socota mid kastoo ka mid ah joog-u-taxyadan soo socda. OGOW: Dokumentiyada aqoonsiga ee dhacey ayaa loo aqbali karaa sida caddeyn aqoonsi.

<p>Mid ka mid ah dokumentiyadan soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Warqadda dhalashada ee ay bixiso dowladda Mareykanka • Warbixinta Qunsuliyadda ee Dhalashada Dibadda (FS-240, CRBA) • Caddeynta Warbixinta Dhalashada (DS-1350) • Caddeynta Dhalashada Dibadda (FS-545) • Kaarka Aqoonsiga Muwaadinka Mareykanka ah (I-197 ama nuqulkii hore I-179) • Kaarka Waqooyiga Mariana (I-873) • Wareegtada kama-dambeysta ah ee korsahsada ee muujinaysa magaca qofka iyo goobta dhalashada Mareykanka • Diiwaanka Shaqada Adeegga Madaniga ah ee Mareykanka oo muujinaya shaqada ka hor 1-da Juun, 1976 • Diiwaan militeri oo muujinaya goob dhalasho Mareykan ah • Diiwaanka caafimaadka Mareykanka ee laga helay bukaan-eegto, isbitaal, dhakhtar, ummuliso ama hay'ad oo muujinaya goob dhalasho Mareykan ah • Diiwaanka caymiska bixiya magta qofka caymisan, caafimaadka ama caymiska kale ee muujinaya goob dhalasho Mareykanka ah • Diiwaan diimeed muujinaya goob dhalasho Mareykanka ah oo lagu diiwaangeliyay Mareykanka. • Diiwaan iskuul oo muujinaya magaca ilmaha iyo goobta dhalashada Mareykanka ah • Diiwaanka tira-koobka Gobolka ama Federaalka oo muujinaya jinsiyadda Mareykanka ama goobta dhalashada Mareykanka • Dokumentiyada ilmaha la korsanaya ee 	<p>IYO mid ka mid ah dokumentiyadan soo socda:</p> <p>Dokumentiga waa in uu leeyahay masawir ama macluumaad kale, sida magaca, da'da, jinsiga, dhererka, miisaanka, midabka isha ama cinwaanka</p> <ul style="list-style-type: none"> • Shatiga daraawalka ee ay bixisay dowladda Gobolka ama Dhulka ama kaarka aqoonsiga ee ay bixisay dowladda Federaalka, gobolka, ama dowladda hoose • Kaarka aqoonsiga iskuulka • Kaarka militeriga Mareykanka ama diiwaanka qabyo-qoraalka ah ama Kaarka aqoonsiga ku-tiirsanaha militeriga • Kaarka Shaqaalaha Maraakiibta ee ay bixiyaan Ilaalada Xeebaha Mareykanka • Kaarka Diiwaangelinta Cod-bixiyaha • Diiwanka bukaan-eegtada, dhakhtarka, isbitaal, ama iskuulka, oo ay ku jiraan diiwaannada daryeelka maalintii ama iskuul horaadka (ee loogu talagalay carruurta ay da'doodu ka yar tahay 19 sano jir). • Laba dokumenti oo ay ku qoran yihiin macluumaad iswaafaqsan oo caddeynaya aqoonsigaaga, sida aqoonsiga loo shaqeeyaha, diblooma kuliyaad ama dugsi sare, warqadaha guurka, wareegtooyinka furitaanka, sabarlogada guri ama dhul.
---	--

<p>dibadda ku dhashey ee qaatay dhalashada Mareykanka ah ee Mareykanka (IR3 ama IH3)</p> <ul style="list-style-type: none"> • Rasiidka Ujuurrada Diiwaangelinta Shakhsiga (Foomka INS ee G-711) • Xog waafaqsan Xaqijinta Nidaamsan ee Xaq-u-yeelashada Shisheeyaha / Systematic Alien Verification for Entitlements (SAVE) ama hannaan kastoo kale ee ay yagleeshay Waaxda Amniga Gudaha si ay u xaqijiso in shakhsiga uu muwaadin yahay 	
---	--

Caddeynta caymis caafimaad kale la'aan

Caddeynta in aadan xaq u lahayn Medicare

OGOW: Haddii aad xaq-u-leedahay Medicare (haddii aad ku qoran tahay ama aadan ku qornaynba) adiga xaq uma lihin canshuur dhaaf.

- Warqadda ama bayaanka dheefaha Medicare ee caddeynaya in aadan xaq u lahayn dheefaha Medicare. Warqaddu waa in ay ku qoran yihiin taariikhda ugu dambeysay ee aad xaq u yeelatay Medicare.
- Kaarkaaga isku qoridda Medicare (xaq uma yeellan doontin canshuur dhaaf haddii aad haysato kaarka isku qoritaanka).
- Caddeynta Xaq-u-yeelasho la'aanta Foomka Caymiska Kale ee Caafimaadka, HBE 13-010. Foomkan waxaa laga heli karaa https://www.wahealthplanfinder.org/content/dam/wahbe-assets/materials/declaration-of-ineligibility-for-other-coverage/HBE_NC_161219_Declaration_Of_Ineligibility_Form.pdf

Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo wuxuu dhigayaa in haddii aad xaq u leedahay dheefaha Medicare, iyadoo aan la eegayn haddii aad isku qortay ama haddii kale, xaq uma yeelanayso canshuur dhaaf. Haddii aad xaq u leedahay Medicare ama aad qaadanayso canshuur dhaaf, waxay u badan tahay in aad dib u bixinayso canshuur dhaafkaasi lagu sameeyay dhammaan sannadka marka aad soo gudbisno canshuur-celintaada IRS.

Caddeynta in aadan ku qornayn caymis kale oo caafimaadka guud ah

- Warqad is-caddeyn ah saxiixan oo sheegaysa in aadan haysan caymis kale.
- Caddeynta Xaq-u-yeelasho la'aanta Foomka Caymiska Kale ee Caafimaadka, HBE 13-010. Foomkan waxaa laga heli karaa https://www.wahealthplanfinder.org/content/dam/wahbe-assets/materials/declaration-of-ineligibility-for-other-coverage/HBE_NC_161219_Declaration_Of_Ineligibility_Form.pdf

- Nuqulka kaarka ama siyaasadda caymiska oo muujinaya taariikhda bilowga isqoritaanka ama taariikhda joojinta.
- Bayaanka dheefaha caafimaadka ee bixinaysa xaqiijinta caymiska caafimaadka iyo taariikhaha dhicitaanka.
- Warqad joojin oo ka timid shirkadda caymiska.
- Warqad ka timid Maamulka Askartii hore ee muujinaysa joojinta caymis caafimaad kale oo hore, taas oo ay ka mid tahay taariikhda dhicitaanka.
- Warqad ka timid ururka Peace Corps oo muujinaysa joojinta caymis caafimaad kastoo hore, taas oo ay ku qoran tahay taariikhda dhicitaanka.
- Warqad ama bayaan ka yimid Washington Apple Health, Medicaid ama Children's Health Insurance Program (CHIP) oo xaqiijinaysa joojinta caymis hore, taas oo ay ku qoran tahay taariikhda dhicitaanka.

Caddeynta xiritaan la'aanta

- Warqadaha rasmiga ah ka sii fasaxidda xabsiga ama Waaxda Asluubta.
- Warqadaha siideynta waqtigii oon la gaarin.
- Foomka caddeynta Xirtaanka ayaa laga helaa https://www.wahealthplanfinder.org/content/dam/wahbe-assets/materials/proof-of-non-incarceration/HBE_NC_161219_Declaration_Of_Non_Incarceration_Form.pdf
- Aqoonsiga gobolka oo aan dhicin, shatiga daraawalka, aqoonsiga shaqada, baasaboorka Mareykanka, Kaarka Degannaha Joogtada ah ee Sharciga ah (I-551), ama Kaarka Oggolaanshaha Shaqada (I-766).
- Gummadka ka soo hara jeegga mushaarka.
- Warqadda dheefta federaalka, gobolka ama degaanka.
- Diiwaannada bukaan-eegtada, dhakhtarka, ama isbitaalka ee adeegyada la bixiyey.
- Sharraxaadda cabashada caafimaadka ee dheefaha la bixiyay.
- Jadwalka/diiwaanka iskuulka ee muujinaya isqoritaanka (sida, loogu talagalay ardayda jaamacadda).
- Bayaanka bankiga ama kaarka deynta ee muujinaya taariikhda macaamulaadka (muujinaya kaliya magaca shakhsiga su'aasha ka taagan; aan ahayn xisaabaha la wadaago).
- Diiwaannada militeriga.
- Biilka telefoonka gacanta (muujinaya kaliya magaca shakhsiga su'aasha ka taagan).
- Heshiiska kirada (waa in uu noqdaa heshiis kiro firfircoon halka shakhsiga uu hadda deggan yahay).
- Bayaanka la saxiixay lana nootaayey ee laga helay shakhsiga leh eedaynta iswaafaqsanaan la'aanta been-abuurka ah ee xiritaanka ee tilmaamaysa in ay ku nool yihiin bulshada dhexdeeda waxaanna ku jira magacooda, taariikhdooda dhalashada iyo cinwaanka.

- Rasiidyada kirada (ee muujinaya kaliya magaca shakhsiga leh iswaafaqsanaan la'aanta xiritaanka ee been-abuurka ah).
- Bayaan qoraal ah oo ka yimid qof bulshada ka tirsan taas oo sheegaysa magaca, taariikhda dhalashada, cinwaanka, lambarta telefoonka, xiriirka ay la leeyihiin shakhsiga leh eedaynta iswaafaqsanaan la'aanta been-abuurka ah ee xiritaanka iyo in shakhsiga uu joogo kagana qaybgalaya bulshada gudaheeda.

Caddeynta lambarka Damaannada Bulshada (SSN)

- Kaarka Damaannada Bulshada.
- Foomka(foomamka) canshuurta.
- Bayaanka dakhliga ama dheefta ee ka yimid Damaannada Bulshada ee ku jira SSN-kaaga.
- Codsiga go'aanka sugaya ee SSN.
- Warqadda ka timid Damaannada Bulshada ee sheegaysa in aadan xaq u lahayn SSN ama aad kaliya xaq u leedahay SSN aan shaqada ahayn.
- Warqadda sheegaysa in aad diiday in aad hesho SSN loogu talagalay diidmada diimeed ee la caddeeyay.
- Kaarka isqoritaanka Qabiilka ee muujinaya magaca iyo SSN oo dhammeystiran.

Caddeynta xubinnimada Qabiilka

- Kaarka xubinnimada/isqoritaanka qabiilka (waxaa laga yaabaa in uu dhacey).
- Dokumenti sax ah oo ka yimid Qabiilka oo caddeynaya xubinnimada shakhsiga.
- Kaarka Hinddada Mareykanka I-872.
- Isqoritaanka qabiilka Hindida Mareykanka iyo Dadka Asal Ahaan u dhashay Alaska ama dokumentiga saamilaha.

Dokumentiga isqoritaanka ama xubinnimada laga helay Qabiilka federaal ahaan loo aqoonsaday ama Xafiiska Arrimaha Hindida. Waa in ay noqotaa warqadda madaxeeda sare ku suntan Qabiilka ama kaarka xubinnimada/isqoritaanka ee leh shaabadda Qabiilka iyo/ama saxiixa rasmiga ah.

- Dokumentiga ay soosaareen Qabiilka/tuulada Alaskan Asal ah, ama Xeerka Alaska Native Corporation Settlement Act (ANCSA) ee shirkada gobol ama tuulada oo caddeynaya xaaladda saamilayda.
- Shahaaddada Heerka Dhiigga Hindida (CDIB) ee uu soosaarey Guddiga Arrimaha Hindida ama Qabiilka, haddii CDIB ay ku jiraan macluumaadka isqoritaanka Qabiilka.
- Warqadda ka timid Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha (HHS) ee Mareykanka ee u oggolaanaya ka reebidda Qabiilka oo ku saleysan xubinnimada Qabiilka ama xaaladda saamilayda Alaskan Asal ah.
- Bayaanka ama Gummadka lacag-bixinta qof kasta.